Aragti guud oo ka fiican, xataa daryeel ka fiican

Tusmada bukaan socodka qaranka. Fursad cusub oo ay daryeelka caafimaadku ku helayaan maclumaadkaaga.

Sawir buuxa oo ka fiican

Tusmada bukaan socodka qaranka waxa hada tartiib tartiib looga bilaabey Iswiid-han. Waxa hada ay ka shaqeysaa golaha deeganka, dawlada hoose iyo daryeel caafimaad bixiyayaasha gaarka loo leeyahey.

Adigu uma baahnid inaad wax sameysid. Maaha hada xiligan. Laakiin marka xigta ee aad u baahato daryeel, dhakhtarka ama shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka ayaa ku weydiin kara ogolaanshahaaga inay helaan macluumaad ku dhigan malafkaaga.

Waxaad xaq u leedahey in aanad ku jirin habka tusmada bukaan socodka qaranka. Hadii aad taas dooneyso, waxa masuuliyadaada ah inaad u sheegto shaqaalaha caafimaadka warbixinta ay u baahan yihiin inay ogaadaan si ay kuu siiyaan daryeel fiican oo amaan ah.

Bogga 1177.se/sammanhallen-journalforing ayaa ah meesha aad ka heli doonto dhamaan warbixinta. Waxaad booqan kartaa boggan si aad jawaab uga hesho su'aalaha aad hayso. Waxa kale oo aad ka arki kartaa xiliga bixiyaha daryeelkaaga caafimaadkaagu uu qorsheynaayo inuu adeegsan tusmada bukaan socodka qaranka.

Wax kastaa way isku xidhan yihiin

Waxaad dareemayso waa wax sababo badan ka koo-ban. Hadii anagu, dadka ka shaqeeya daryeelka caafi-maadka, aanu aqoon badan kuu leenahey, waxaanu ku siin karnaa daryeel dhakhso badan oo ka fiican. Taasina waa sababta aanu diiwaanka u kaydino.

Diiwaankaasi waxa ku jira taariikhda daaweyntaada ee uu daryeel bixiye gaar ahi ku siiyey. Hasayeeshee, dhamaan diiwaanada ay daryeel caafimaad bixiyayaasha kala duwani hayaan layskuguma soo ururin meel kaliya. Daryeel nooc kasta oo aad ka heshay mid ka mida daryeel caafimaad bixiyayaasha loogama arki karo si toosa mid kale.

Patientdatalagen (Xeerka Macluumaadka Bukaan-socodka) ayaa hada u saamaxaaya daryeel caafimaad bixiyayaasha iney akhriyaan macluumaadka ku qoren diiwaankaaga. Taas micnaheedu waxa weeye in qofka aad booqatey uu heli karo macluumaadka adiga ku khuseeya, iyadoon loo eegeyn golaha deegaanka, dawlada hoose ama daryeel caafimaad bixiyayaasha gaarka loo leeyahey ee aad u doonato daryeelka.

Taas waxa loo yaqaanaa tusmada bukaan socodka qaranka. Waxa loo dhisay si ay noogu suurto gasho inaanu si dhib yar u aragno taariikhda daaweyntaada iyo inaad si dhakhso ah u hesho daryeel fiicaan oo ammaan ah.

Adiga shuruudahaaga

Tusmada bukaan socodka qaranku waxay u suurto galineysaa qofka adiga ku siinaaya daryeelka inuu arko nooca daryeelka hore laguu soo siiyey. Tusaale ahaan, waxay arki karaan inaad wax xasaasiyad ka leedahey iyo inaad qaadanayso daawooyin aan la ogoley in lala qaato daawooyin kale.

Kaliya shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee kula leh xidhiidhka bukaan socodka ayaa heli kara macluumaadka malafkaaga. Waa inay marka hore ku waydiistaan ogolaanshahaaga.

Ma waxaad dooneysaa inaad tusto kaliya qayb kamid ah macluumaadkaaga, oo aanad dhamaan wada tusin? Waxaad xakameyn kartaa warbixinta malafkaaga ee aanad rabin in la siiyo daryeel caafimaad bixiyayaasha kale. Waa adiga cida go'aamineysa macluumaadka la xakameynaayo iyo xiliga la xakameynayaa intuu leeg yahey. Waxaad dalban kartaa in xakameynta laga qaado markasta.

Adigaa go'aaminaaya.

Landstinget i Östergötland

14 su'aalo ku sabsan tusmada bukaan socodka qarana

Ayaa arki kara macluumaadkeyga?

Shaqaalaha daryeelka caafimaadka oo si sugan loo soo cadeeyey una baahan macluumaadkan si ay kuu siiyaan daryeel fiican oo amaan ah ayaa heli kara tusmada bukaan socodka qaranka. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka waa inay xidhiidhka bukaan socod kula lahaadaan adiga oo ay haystaan ogolaanshahaaga.

Sidee ayaan u hubiyaa in sharafteyda la dhowrey?

Shaqaalaha caafimaadka oo si sugan loo soo cadeeyey ayaa akhriyi kara malafkaaga bukaan socodka. Waa inay iyagu kula lahaadaan xidhiidhka bukaan socodka adiga oo ay haystaan ogolaanshahaaga. Waa suurto gal in diiwaan la isticmaala si loo raad raaco cida akhrisatey malafkaaga, iyada oo aad u leedahey xaq inaad aragto diiwaankaas. Daryeel bixiye kastaa waxa uu si nidaamsan u ilaaliyaa diiwaankaas.

Miyaan xakameyn karaa macluumaadka?

Haa, adiga ayaa go'aaminaaya in malafka bukaan socodka la xakameeyo guud ahaan iyo qayb ahaanba waxa ku jira tusmada bukaan socodka qaranka. Waxa kale oo aad go'aamineysaa in ama marka xakameynta laga qaado.

Hadii aad dalka dibadiisa joogo?

Tusmada bukaan socodka qaranka waxay khuseysaa kaliya Iswiidhan.

Maxaa dhacaaya hadii aan miyir-beelo?

Waxay shaqaalaha daryeelka caafimaadku dalban karaan in "furitaan xaalad deg-deg ah" oo tusmada bukaan socodka qaranka la sameeyo si loo helo macluumaadkaaga. Hasa yeeshee, tan kuma jiraan macluumaadka la xakameeyey oo ku jira daryeel caafimaad bixiye kale. Furitaanka xaalada deg-dega ah waxa si joogto ah u ilaaliya daryeel caafimaad bixiyaha.

Anigu ma doonaayo inaan ka mid noqdo tusmada bukaan socodka qaranka!

Waxaad xaq u leedahey inaanad inaanad ku jirin tusmada bukaan socodka qaranka. Hadii aad taas u sheegto daryeel caafimaad bixiyahaaga, daryeel bixiye kale ma heli karo macluumaadkaaga.

Miyey internedka ku jiraan macluumaadkeygu?

Maya, dhamaan malafyada waxa lagu kaydiyaa nidaamka ku kooban meesha ee daryeel caafimaad bixiyayaasha.

Hal bukaan socod – hal xidhmo oo malafyo ah?

Maya. Waxay tusmada bukaan socodka qaranka micnaheedu tahey in dhowr daryeel caafimaad bixiye ay heli karaan midba ma kale macluumaadkiisa hadii adiga bukaan socodka ahi aad siisey ogolaanshahaaga.

Miyey ku jiraan macluumaadka daawadeydu?

Haa, macluumaadka daawada waa ay ku jiraan tusmada bukaan socodka qaranka.

Miyaan xakameyn karaa macluumaad-ka ilmaheyga?

Maya, ma xakameyn kartid macluumaadka ku sabsan carruurtaada. Marka ilmahu uu koro ee uu caqliyeysto, waa ay xakameyn karaan iyagu macluumaadka.

Miyey cid kal ii bixin kartaa ogolaanshaheyga?

Maya, adiga bukaan socodka ah oo kaliya ayaa bixin kara ogolaanshahaaga.

Maxaa dhacaaya hadaan xakameynta ka qaado?

Waxay tusmada bukaan socodka qaranka tusaysaa in macluumaadka la xakameeyey. Waxaad go'aansaneysaa inaad la qaybsato macluumaad la xakameeyey shaqaalaha daryeelka caafimaadka.

Nabad ilaalinta IT-da tee ayaa la isticmaaley?

Xeerka Macluumaadka Bukaan-socodka iyo nidaam-maamuleedkiisu waxay leyihiin shuruudo khaas ah oo ogolaansho rasmi ah iyo maamul helitaanka ah. Datainspektionen (Gudiga Baadhista Macluumaadka) ayaa ah maamulka masuuliyadadeeda leh.

Maxaa loo sameeyey tusmada bukaan socodka qaranka?

Sharci dajiyayaashu waxay dooneyaan inay adkeeyaan sharafta, amaanka iyo kalsoonida bukaan socodka. Shaqaalaha daryeelka caafimaadku waxay si ka dhib yar, ka amaansan oo ka dhakhso badan u heli karaan sawir buuxa oo taariikhda daaweyntaada. – taas waxay iyaga u suurto galisaa inay iyagu si dhakhso badan kuu siiyaan daryeel fiican oo amaan ah.

Liistada yare ee ereyada

Diiwaan	Marka shaqaalaha daryeelka caafimaadku ay akhristaan malafkaaga, waa la diiwaan galiyaa taas iyadoo hadhow dib loo eegi karo. Waxaad xaq u leedahey inaad eegto cida akhridey macluumaadka ku jira malafkaaga.
Furitaanka xaalada deg-dega ah	Tani waxay u ogolaaneysaa shaqaalaha inay helaan macluumaadka malafkaaga markaanad adigu siin Karin ogolaanshahaga. Furitaanka xaalada deg-dega ah waxa si joogto ah u ilaaliya daryeel caafimaad bixiyaha.
Xeerka Macluumaadka Bukaan socdka	Xeer la sameeyey 2008 oo leh sharci isku dhagan oo ku sabsan sida macluumaadka shakhsiga ee daryeelka caafimaadka loo maareeyo. Xeerku waxuu maamulaa sir haynta, tusmada bukaan socodka qaranka, dadka xaqa u leh iney helaan macluumaadka bukaan socodka iyo xuquuqda bukaan socodka ay ku xakameynayaan macluumaadka.
Xidhiidhka bukaan socodka	Marka shaqaalaha daryeelka caafimaaku ay adiga xidhiidh kula sameeyaan iyagoo ku daryeelaaya ama ku daaweynaaya.
Tusmada bukaan socodka qaranka	U ogolaaneysaa daryeel caafimaad bixiyayaasha inay akhriyaan macluumaadka ku dhigan malafka daryeel caafimaad bixiye kale.
Ogolaansho	Markaad haa tidhaahdo oo aad siiso ogolaanshahaaga shaqaalaha daryeelka caafimaadka si ay u helaan tusmada bukaan socodka qaranka.
Xakameyn	Kuu ogolaaneysa inaad xakameyso aanad rabin in ay daryeel caafimaad bixiyayaasha kale arkin.
Daryeel caafimaad bixiyayaasha	Goleha deegaanka, dawlada hoose iyo shakhsiyaadka kale ee sharciga ama daryeel caafimaad bixiyayaasha gaarka loo leeyahey ee sameeya adeega daryeelka caafimaadka.
Shaqaalaha dary-eelka caafimaadka	Shaqaalaha u shaqeeya daryeel caafimaad bixiyayaasha si ay u maamulaan daryeelka iyo daaweynta.

Ma doonaysaa liiska raad-reebka ama al-baabka u xirto warbixin-shaqsiyeedkaaga? Warqad u soo qor:

Personuppgiftsombudet (Wakiilka warbixin-shaqsiyeedka)
Landstinget i Östergötland
581 91 Linköping

Meelo kala duwan oo aad warbixin ka heli karto:

www.1177.se/sammanhallen-journalforing

www.datainspektionen.se/lagar-och-regler/patientdatalagen

www.regeringen.se